

OGAANSHAHA HORE & WAXQABADKA MAQALKA DHEGAHA MACLUUMAADKA QOYSASKA & DARYEELEYAASHA



**DEPARTMENT
OF HEALTH**

CHILDREN & YOUTH WITH
SPECIAL HEALTH NEEDS

Ogaanshaha Hore & Waxqabadka Maqalka Dhegaha: Macluumaadka Qoysaska & Daryeeleyaasha

Hordhac

MDH waxay u diraan gal dukumeenti daabacan qoysaska ku nool Minnesota ee leh carruur dhawaan laga helay dhagoolnimo ama dhago la'aan. Dukumentigan wuxuu bixinayaa inta badan kheyraadka oo ah qaab elektaroonik ah wuxuuna bixiyaa kheyraadka af Soomaali, marka la heli karo. Kheyraadka kaliya ee laga heli karo qaab daabacan laguma darin liiskan, balse waxaan si toos ah ugu xireynaa bogga internetka ee hay'adda. Dukumentigan wuxuu loogu talagalay waalidiinta doonaya inay helaan nuqul elektaroonik ah oo u dhigma agabka daabacan. Qoysaska kale, macallimiinta, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, iyo u doodeyaasha qoysaska, nuqulkan elektarooniga ah wuxuu loogu talagalay inuu hagto wadahadallada ama ka caawiyo qoysaska fahamka agabka daabacan.

- [Somali Early Hearing Detection & Intervention Parent Letter and FAQ
\(www.health.state.mn.us/docs/people/childreneyouth/improveehdi/parentletter-som.pdf\)](http://www.health.state.mn.us/docs/people/childreneyouth/improveehdi/parentletter-som.pdf)

Bayaanka Shaacinta

Kheyraadkan ma bixiyo talo caafimaad. Wuxuu bixiyaa macluumaad guud oo la xiriiira maqalka. Carruurta iyo qoysaska mid kasta way ka duwan yihiin, waxaana dhici karta in qaar ka mid ah macluumaadka uusan si gaar ah u khusaynin ilmihiiinna. Mar kasta waa in dhakhtarka ilmaha lagala hadlo wixii ah su'aalo ama walaac oo ku saabsan xaaladaha caafimaadka.

Ixtiraamka Aqoonsiga shakhsiyeed

Waxaan ixtiraameynaa wixii ay dadku sheegtaan ee ah aqoonsigooda. Dadku waxay isu aqoonsan karaan in ay yihiin dhagool, qof dhega culus, qof aan dhegaha wax ka maqlin, qof maqalkiisu dadka ka duwan yahay, iwm. Waxaa laga yaabaa in aad aragto ereyada “deaf and hard of hearing (dhagool iyo qof dhega culus ama DHH),” oo loo adeegsanayo si guud-ahaaneed. Waxaad isticmaali kartaa ereyga “maqal la'aanta” marka baaritaan ahaan wax lagu soo ogaado.

Jadwalka mowduucyada

[Qeybta 1 – Ogaanshaha hore & waxqabadka maqalka dhegaha](#)

[Qeybta 2 – Dhagaysiga iyo maqal baarista](#)

[Qeybta 3 – Xiriirrada qoyska](#)

[Qeybta 4 – Kobaca iyo horumarinta](#)

[Qeybta 5 – Isgaarsiinta](#)

[Qeybta 6 – Daryeelka caafimaadka](#)

[Qeybta 7 – Khayraadka guud](#)

Qeybta 1 – Ogaanshaha hore & waxqabadka maqalka dhegaha (Early Hearing Detection & Intervention [EHDI])

Khariidadda EHDI

Raacida EHDI Roadmap (Khariidadda EHDI) waxaad la xiriiri doontaa barnaamijyada iyo kheyraadka kuu diyaar ah, isla markaana waxaad la shaqeyn doontaa dhakhtarka ilmahaaga, adigoo raacaya qorshaha daryeelka. Iyada oo la helayo daryeel hore iyo xiriir la leh faragelin, qoyskaaga wuxuu helayaa taageero inta ilmahaagu horumarinayo xirfadaha luqadda iyo isgaarsiinta. La xiriir barnaamijyadaas markaad ilmahaaga iyo qoyskaaga u saameyneyso go'aamada hore, si loo hubiyo caafimaadka wanaagsan iyo horumarka ilmahaaga..

- [Ogaanshaha Hore & Waxqabadka Maqalka Dhegaha: Jadwal ah tallaabo-tallaabo oo loogu talagalay qoysaska iyo daryeeleyaasha \(www.health.state.mn.us/docs/people/childreneyouth/improveehdi/roadmap-som.pdf\)](http://www.health.state.mn.us/docs/people/childreneyouth/improveehdi/roadmap-som.pdf)

Window of opportunity (Waqtiga habboon ee fursadda)

Marka ay dhashaan ka dib, maskaxda nuunnaha si degdeg ah ayey u kobceysaa. Kahor intaan ilmo yar awood u yeelan inuu hadlo, waxay daawadaan, dhegaystaan, oo bartaan dhawaaqa ereyada kala duwan iyo dhinacyo kale oo muhiim ah oo hadalka iyo luqadda ah. Wakhtigan waxaa badanaa loo yaqaan "Window of Opportunity" (Waqtiga Habboon ee Fursadda) barashada luqadda.

- [Fursadda hore ee Maqalka \(www.health.state.mn.us/people/childreneyouth/improveehdi/windofopp-som.pdf\)](http://www.health.state.mn.us/people/childreneyouth/improveehdi/windofopp-som.pdf)

Qeybta 2 – Dhagaysiga iyo maqal baarista

Doorka dhakhtarka dhagaha waa maxay?

Dhakhtarka dhagaha waa xirfadle caafimaad oo shati haysta kaas oo qiimeeya, ogaada, daweeya, oo maareeya lumitaanka maqalka iyo dhibaatooyinka dheelitirka. Dhakhaatiirta dhagaha waxay isticmaalaan farsamooyin gaar ah si ay u qiimeeyaan maqalka dhallaanka iyo carruurta, waxayna ku taliyaan qalab maqal oo ku habboon, marka la doorto. Qoysasku waxay la shaqeeyaan dhakhaatiirta dhegaha labadaba rugtooda caafimaad ama iskuulkooda.

- English: [Questions you may want to ask your child's audiologist \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/audiologist_questions_eng.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/audiologist_questions_eng.pdf)

Qalabka maqalka

Dhakhtarka dhegaha ee ilmahaaga ayaa ku caawin doona inaad fahanto habka qalabka maqalka, haddii qoyskaagu doorto in ay isticmaalaan. Sida laga soo xigtay [Minnesota Statute 62Q.675 \(www.revisor.mn.gov/statutes/cite/62Q.675\)](http://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/62Q.675): Qorshaha caafimaad waa inuu daboolaa qalabka maqalka dhammaan dadka qaba dhibaataada maqalka ee aan lagu sixi karin habab kale

oo la daboolo. Daboolka loo baahan yahay qeybtaan waxaa lagu xadiday qalab maqalka hal dhagax kasta saddexdii sanaba mar.

- English: [Hearing Aids - 18 Years or Younger \(https://mn.gov/deaf-commission/assets/2.02-Hearing%20Aids%20Law%203-2017-Web_tcm1063-529917.pdf\)](https://mn.gov/deaf-commission/assets/2.02-Hearing%20Aids%20Law%203-2017-Web_tcm1063-529917.pdf)
- English: [Hearing aid insurance appeals \(https://edocs.dhs.state.mn.us/lfs/Server/Public/DHS-7915-ENG\)](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfs/Server/Public/DHS-7915-ENG)
- English: [Hearing aid financial resources \(https://mn.gov/deaf-hard-of-hearing/assistive-technology/hearing-aids/hearing-aid-resources.jsp\)](https://mn.gov/deaf-hard-of-hearing/assistive-technology/hearing-aids/hearing-aid-resources.jsp)

State of Minnesota Pediatric Hearing Device Loaner Program (Barnaamijka Amaahda Qalabka Maqalka ee Carruurta ee Gobolka Minnesota)

Waxa [State of Minnesota Pediatric Hearing Device Loaner Program \(www.hearbank.web.health.state.mn.us\)](http://www.hearbank.web.health.state.mn.us) Waxaa jira qalab maqalka oo la heli karo in la isticmaalo inta ay oggolaanshaha caymiska sugayo. Dhakhtarkaaga dhegaha ayaa kuu dalban kara qalabkan maqalka.

Qeybta 3 – Xiriirrada qoyska

Taageero waalid-ilaawaalid iyo Deaf Mentor/Deaf and Hard of Hearing Guide (Lataliyaha Dhagoolka/Hagaha Dhagoolka iyo Maqalka-yar) ayaa qoysaska waxaa u fidiya barnaamijyo dhaqaale-gacan-siineed laga helay oo ku yaal Minnesota. Barnaamijyadani waxay bixiyaan macluumaad dhexdhexaad ah oo ku saabsan isgaarsiinta, waxbarashada, xulashooyinka caafimaadka, iyo aragtiyada waalidiinta iyo dadka ku koray iyagoo dhagool ah iyo maqal yar. Baro wax badan oo ku saabsan kuwan iyo taageerooyin dheeraad ah hoos.

Minnesota Hands & Voices

Parent Guides (Hageyaasha Waalidka)

[Minnesota Hands & Voices \(www.mnhandsandvoices.org\)](http://www.mnhandsandvoices.org) Barnaamijka Parent Guides (Hageyaasha Waalidka) wuxuu bixiya taageero aan dhinacna u ahayn, waalid ilaa waalid, oo loogu talagalay qoysaska cusub ee ogaaday farqiga maqalka ee ilmahooda.

"Waxaan nahay waalid carruur Deaf and Hard of Hearing (Dhagoolaha iyo Dadka Maqalka Daciifka ah) ah, waxaan wadaagno waayo-aragnimo, rajooyin, iyo riyoooyin isku mid ah oo awood leh. Waxaan halkan u joognaa inaan taageerno qoysaska sida kaaga oo kale ee jooga Minnesota oo dhan. Waa rumaysnidayada xooggan in adiga, sida waalid, aad ogtahay waxa ugu fiican ilmahaaga, waxaan halkan u joognaa inaan ku hageyno barnaamijyada, kheyraadka, iyo xiriirada kaa caawin doona inaad gaadho go'aano sax ah oo xog-ogaal ah. Ma jiraan xaddidaadyo ku saabsan awoodda ilmahaaga." – *Minnesota Hands and Voices*

Deaf and Hard of Hearing Guides (Hagayaasha Dhagoolaha iyo Dadka Maqalka Daciifka ah)

Barnaamijka [Deaf and Hard of Hearing Guide Program](http://www.lssmn.org/mnhandsandvoices/about-us/deaf-and-hard-hearing-guide-program)

(www.lssmn.org/mnhandsandvoices/about-us/deaf-and-hard-hearing-guide-program) wuxuu ka caawiyaa qoysaska iyo carruurtooda inay helaan dad ay ku daydaan oo la wadaaga khibradooda nolosha markay korayeen.

“Deaf and Hard of Hearing Guides wuxuu ka shaqeyaa in si cadaalad ah lagu helo khayraadka, wuxuuna ka caawiyaa qoysaska iyo carruurta inay helaan xalal wax ku ool ah oo ay uga gudbaan caqabadaha caadiga ah ay la kulmaan Dhegoolayaasha/Carruurta aan si Fiican wax u Maqal.” – *Minnesota Hands and Voices*

Deaf Mentor Family Services (Adeegyada Qoyska ee Lataliyaha Dhagoolka)

[Deaf Mentor Family Services \(www.lssmn.org/dmfs\)](http://www.lssmn.org/dmfs) Waxay ka kooban tahay saddex barnaamij oo kala duwan: Barnaamijka Deaf Mentor Family Program, Snapshots, iyo EMPOWER!

“Deaf Mentors waxay si fiican ugu hadlaan Luuqadda Tilmaanta Gacanta ee (ASL). Waxay kaloo xidhiidh wanaagsan la yeeshaan xubnaha qoyska ee wax maqla wayna ku raaxaystaan la shaqeynta carruurta. Inta lagu jiro booqashooyinka, qoysaska waxay bartaan ASL iyo farsamooyinka xidhiidhka ee u gaarka ah carruurta dhegoolaha ah iyo kuwa aan si fiican wax u maqal. Xubnaha qoyska waxaa lagu dhiirigalinayaa inay weydiiyaan su’aalo ku saabsan ASL, dhaqanka dhegoolayaasha, iyo nolol maalmeedka qofka dhegoolaha ah ama aan si fiican wax u maqal.” – *Deaf Mentor Family Services of Lutheran Social Service of Minnesota*

Minnesota DeafBlind Project (Mashruuca Dhegaha iyo Aragga La'aanta ee Minnesota)

Waxaa [Minnesota DeafBlind Project \(www.dbproject.mn.org/\)](http://www.dbproject.mn.org/) Wuxuu bixiya taageero qoys, wadaagista kheyraadka, aqoon-is-weydaarsiyo, webinars, mentoring, iwm, qoysaska iyo kooxaha iskuulka ee carruurta iyo dhallinyarada leh khasaare maqal iyo arag labadaba, laga soo bilaabo dhalashada ilaa da'da 22.

“Minnesota Deafblind Project (Mashruuca Dhegaha iyo Aragga La'aanta ee Minnesota) wuxuu aaminsan yahay muhiimadda ay leedahay in qoysasku bartaan wax walba oo ay ku saabsan tahay khasaare maqal iyo arag oo isku dhafan. Minnesota DeafBlind Project (Mashruuca Dhegaha iyo Aragga La'aanta ee Minnesota) wuxuu bixiya taageero gaar ah oo loogu talagalay qoysaska kala duwan iyada oo loo marayo wicitaanno fiidiyoow/telefoon, farriimo qoraal ah, wadaagista kheyraadka, fursadaha tababarka, iyo kordhinta xiriirrada gudaha shabakad iyo bulshada Dhegaha iyo Aragga La'aanta.” – *Minnesota DeafBlind Project*

DeafBlind Services Minnesota (Adeegyada Dhegaha iyo Aragga La'aanta ee Minnesota)

[DeafBlind Services Minnesota \(www.visionlossresources.org/programs/dbsm/children-youth-and-family-services/\)](http://www.visionlossresources.org/programs/dbsm/children-youth-and-family-services/) Wuxuu bixiya taageero, macluumaad, tixraac, tababar, iyo u doodista carruurta dhegaha iyo aragga la'aanta ee da'doodu tahay 0-21 sano intay iskuulka ku jiraan iyadoo lagu saleynayo Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shaqsiga) (IFSP)/ Individualized Education Program (Qorshaha Waxbarashada ee Shaqsiga) (IEP). Shaqaalaha faragelinta waa shaqaale tababaran oo la shaqeeya carruurta dhegaha iyo aragga la'aanta si ay u bartaan deegaanka, bulshada, uga gaaraan yoolalka horumarka, iyo inay horumariyaan istaraatiijiyadaha isgaarsiinta.

Qeybta 4 – Kobaca iyo horumarinta

Help Me Grow

[Help Me Grow MN \(https://helpmegrowmn.org/HMG/Somali/index.html\)](https://helpmegrowmn.org/HMG/Somali/index.html) Waxay leedahay ilo badan oo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha oo ku saabsan koritaanka dhallaanka, socod-baradka, iyo carruurta yaryar. Tani waxay ka mid tahay macluumaad iyo fiidiyowyo ku saabsan xirfadaha la fiiriyo, hawlgallada taageera horumarka, sheekooyinka qoyska, iyo macluumaad ku saabsan sida loo helo caawimaad marka su'aalo ama welwel ka jiraan horumarka ilmaha. Carruurta dhegaha iyo maqalka xun leh waxay xaq u yeelan karaan inay helaan taageerooyin iyo adeegyo horudhac ah oo bilaash ah. Bixiyaha ka socda barnaamijka degmada iskuulka ee qoyska ayaa la xiriira qoyska ka dib marka xidhiidh laga sameeyo Help Me Grow wuxuuna la shaqeeyaa qoysaska carruurta u qalma si loo sameeyo qorshe ku saabsan tallaabooyinka xiga.

"Faragelinta hore" ("early intervention") waa taageerooyin iyo adeegyo loogu talagalay carruurta laga yaabo inay tahay ama ay halis ugu jirto dib-u-dhac ku yimaad koritaanka iyo qoysaskooda. Adeegyadan waxaa mararka qaarkood loo yaqaan "Infant and Toddler Intervention Services" (Adeegyada Faragelinta Dhallaanka iyo Socod-baradka) ee loogu talagalay carruurta dhalashada ilaa 2 sano. Adeegyadan waxaa mararka qaarkood loo yaqaan "Preschool Special Education Services" (Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiga-ka-horreeya) ee loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 3 sano ilaa ay ka bilaabayaan Kindergartenka. Dhammaan adeegyada faragelinta hore waxa loo bixiyaa lacag la'aan carruurta iyo qoysaska u qalma iyada oo loo marayo degmooyinka iyo iskaashatooyinka dugsiyada dadweynaha ee ku yaal Minnesota oo dhan iyo 11 Qaran oo Qabiil ah oo nala wadaaga dhulka, iyada oo aan loo eegin dakhliga qoyska ama heerka socdaalka. Marka la isku xirto, farageliye hore (khabiir la shaqeeya dhallaanka, socod-baradka, carruurta yaryar ee naafada ah, iyo qoysaskooda) ayaa kula soo xiriiri doona si uu wax badan u ogaado oo uu kaaga caawiyo tallaabooyinka xiga. Tani waxay la macno noqon kartaa samaynta Individualized Family Service Plan. (Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shaqsiga) (IFSP).

- [Wargad Waxbarasho oo Loogu Talo Galay Qoysaska Caruurta Yar ee leh Farqiga Maqalka \(https://mnlowincidenceprojects.org/documents/ehdi/SOM_EducationLetter_forFamilies_of_Young_Children_withHearing_Differences.pdf\)](https://mnlowincidenceprojects.org/documents/ehdi/SOM_EducationLetter_forFamilies_of_Young_Children_withHearing_Differences.pdf)
- English: [Making a Plan for Your Child \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/planforyourchild.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/planforyourchild.pdf)
- English: [Questions you may want to ask your child's early intervention team \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/early_intervention_questions_eng.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/early_intervention_questions_eng.pdf)

Iskuulada iyo barnaamijyada

Waxaa jira iskuulo iyo barnaamijyo badan oo u adeegaya ilmaha iyo carruurta dhegaha iyo maqalka xun leh. Boggan wuxuu leeyahay liis fursadaha waxbarasho ee sharaxaya noocyada barnaamijyada iyo sidoo kale liiska iskuulada iyo barnaamijyada Minnesota iyadoo loo eegayo gobolka juqraafi ahaan.

- English: [Schools and programs serving deaf and hard of hearing children \(https://mn.gov/deaf-hard-of-hearing/hearing-loss/children/education\)](https://mn.gov/deaf-hard-of-hearing/hearing-loss/children/education)

Qeybta 5 – Isgaarsiinta

Ka hor inta ilmuhu uusan hadlin, waxay daawadaan, dhegeystaan, oo bartaan dhawaaqa erayada kala duwan iyo qeybaha kale ee muhiimka ah ee hadalka iyo luqadda. Qoysasku waxay haystaan fursado badan oo ku saabsan luqadda iyo isgaarsiinta carruurtooda yaryar.

- [SAHAMINTA FURSADAHHA ISGAARSIINTA EE CARRUURTA LEH KALA DUWANAANSHAHA MAQALKA: DULMAR GUUD \(www.mnlowincidenceprojects.org/documents/ehdi/SOMALI_21DHS_ExploringCommunication.pdf\)](http://www.mnlowincidenceprojects.org/documents/ehdi/SOMALI_21DHS_ExploringCommunication.pdf)
- English: [Decision Guide to Communication Choices \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/commdecisionguide3508.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/commdecisionguide3508.pdf)

Sidoo kale, waxaa jira kheyraadyo loogu talagalay qoysaska si ay uga bartaan istaraatiijiyadaha isgaarsiineed ee kala duwan. Kuwani waa qaar ka mid ah kheyraadka badan ee onlynka ah ee waalidiinta ay ka baran karaan fursadaha isgaarsiineed ee la heli karo:

- English: [Sign It! \(www.infantheating.org/signit\)](http://www.infantheating.org/signit)
- English: [Hear to Learn \(www.heartolearn.org\)](http://www.heartolearn.org)
- English: [Cue College \(https://cuecollege.org/cue-family-program\)](https://cuecollege.org/cue-family-program)

Qeybta 6 – Daryeelka caafimaadka

Bixiyeyaasha adeegyada caafimaadka

Marka ilmuhu lagu ogaado inuu dhegaha iyo maqalka xun leeyahay, waxaa jira dhakhaatiir iyo bixiyeyaasha daryeelka khaaska ah ee ay arki doonaan. Bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee ilmaha ayaa ka caawin doona isku xirka daryeelka kooxda daryeelka aasaasiga ah, takhaatiirta

khaaska ah, iyo wada-hawlgalayaasha bulshada si loo hubiyo daryeelka qofka oo dhan oo ku saleysan bukaanka iyo in la hagaajiyo caafimaadka guud iyo daryeelka wanaagsan.

- English: [Questions you may want to ask your child's medical professional \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/medical-professional_questions_eng.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/medical-professional_questions_eng.pdf)

Qaar ka mid ah bixiyeyaasha kale ee ilmahaaga laga yaabo inay arkaan waxaa ka mid ah:

- **Ear Nose and Throat (Dhakhtarka Dhegaha, Sanka iyo Cunaha) (ENT) ama Otolaryngologist:** Otolaryngologists waxay sameeyaan qiimeyn caafimaad oo buuxda ee dhegaha, madaxa iyo qoorta iyo qaab-dhismeedyada la xiriira, waxayna bixiyaan maaraynta caafimaad iyo qalliin ee ku habboon iyo oggolaanshaha caafimaad ee qalabka maqalka, marka la doorto.
 - English: [Questions you may want to ask your child's Ear, Nose, and Throat Doctor \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/ent_questions_eng.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/ent_questions_eng.pdf)
- **Dhakhtarka Jiineetiga:** Dhakhaatiirta jiineetiga, oo ay weheliso la-taliyayaasha jiineetiga, waxay bixiyaan qiimeyn iyo talo si ay qoysaska ugu siinayaan macluumaad ku saabsan asalka (sababta) khasaare maqalka, saadaasha maqalka sii xumaanaya, iyo xaaladaha caafimaad ee la xiriira ee u baahan qiimeyn dheeraad ah (tusaale: aragga, wadnaha, kilyaha, iyo kuwa kale).
 - [Hidderaaca keena Maqal La'aanta \(www.health.state.mn.us/people/childrenyouth/improveehdi/hlgenetics-som.pdf\)](http://www.health.state.mn.us/people/childrenyouth/improveehdi/hlgenetics-som.pdf)
 - English: [Questions you may want to ask your child's genetics team \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/genetics-questions_eng.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/genetics-questions_eng.pdf)
- **Dhakhtarka indhaha:** Dhakhtarka indhaha oo qiimeeya aragga ilmahaaga oo hubiya cilladaha aragga ee la xiriira (tusaale ahaan: Cudurka Usher, cataract, ama xaalado kale).
- **Khabiirka hadalka iyo luqadda:** Xirfadle tababaran oo tijaabiya una shaqeeya carruurta la kulma caqabado ku saabsan hadalka iyo luqadda.
 - English: [Questions you may want to ask your child's speech-language pathologist \(www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/speech_language_pathologist_questions_eng.pdf\)](http://www.cdc.gov/hearing-loss-children/media/pdfs/speech_language_pathologist_questions_eng.pdf)

Kheyraadka maaliyadeed

Waxaa jira kheyraadyo maaliyadeed oo loo heli karo qoysaska.

- [Ku soo dhawoow MNSure \(www.mnsure.org/somali/index.jsp\)](http://www.mnsure.org/somali/index.jsp)
- English: [Insurance Affordability Programs Income and Asset Guidelines \(https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3461A-ENG\)](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3461A-ENG)
- English: [Medical Assistance for adults and children who are blind or have a disability or for people 65 years old or older \(https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/public/DHS-2087C-eng\)](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/public/DHS-2087C-eng)
- English: [Minnesota Health Care Programs \(https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3182-ENG\)](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3182-ENG)

Qeybta 7 – Khayraadka guud

Hoos waxaa ku qoran kheyraadyo dheeri ah oo taageero u ah qoyskaaga safarkaaga.

- [Minnestories: Hearing screening](http://www.health.state.mn.us/people/newbornscreening/families/minnestories/hearing) (www.health.state.mn.us/people/newbornscreening/families/minnestories/hearing) waa ururinta sheekooyin gaagaaban oo qoysasku ay wadaagaan khibradooda gaarka ah ee ay la kulmeen ka dib baaritaanka dhalashada.
- [Deaf and Hard of Hearing Services](http://www.mn.gov/deaf-hard-of-hearing) (www.mn.gov/deaf-hard-of-hearing) wuxuu caawin karaa qoysaska inay helaan kheyraad ku habboon baahiyahooda, bartaan khasaare maqalka, helaan tignoolajiyada caawinta iyo qalabka, ku xirmaan kheyraadka caafimaadka maskaxda, iyo inay helaan kheyraadyo ku jira bulshada ay ku nool yihiin.
 - [Shantii qof ee Minnesota degganba mid ayaa dhego beela. Miyaad, ama miyuu qof qoyskaaga ah dhego beelay?](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3982-SOM) (<https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-3982-SOM>)
- [PACER Center](http://www.pacer.org) (www.pacer.org) waa xarun tababar iyo macluumaad oo loogu talagalay waalidiinta qoysaska carruurta iyo dhallinyarada leh naafonimo ama baahiyo caafimaad oo gaar ah laga soo bilaabo dhalashada ilaa dhalinyarnimo. Waalidiintu waxay ka heli karaan daabacaadyo, aqoon-is-weydaarsiyo, iyo kheyraadyo kale oo ka caawinaya qoysaska inay gaaraan go'aano ku saabsan waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo adeegyo kale.
 - [Cawimaad Somali](http://www.pacer.org/somali) (www.pacer.org/somali)
- [Minnesota Hands & Voices Resource Directory](http://www.lssmn.org/mnhandsandvoices/resources-information/resource-directory) (www.lssmn.org/mnhandsandvoices/resources-information/resource-directory) waxaa la abuuray si waalidiinta loo ogeysiyo qaar ka mid ah kheyraadka ugu muhiimsan ee la heli karo. Waa la cusboonaysiiyaa sannad walba.
- Waxaa [Minnesota Commission of the Deaf, DeafBlind, and Hard of Hearing Resources](https://mn.gov/deaf-commission/advocacy-issues/education/resources) (<https://mn.gov/deaf-commission/advocacy-issues/education/resources>) waxaa la sameeyay si ay u xiriiriso waalidiinta, xubnaha qoyska, iyo ardayda dhegaha, dhegaha iyo aragga la'aanta, iyo maqalka xun leh kheyraadka ay u baahan yihiin.

Minnesota Department of Health
 Child & Family Health
 Children and Youth with Special Health Needs
 PO Box 64975
 St. Paul, MN 55164-0975
 651-201-3650 or toll free 1-800-728-5420
health.cyshn@state.mn.us
www.health.state.mn.us/improveEHD/

10/17/2025

To obtain this information in a different format, call: 651-201-3650.